**DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBBALAND EE SOOMAALIYA**

**Hindise Sharciyeed Magaciisu Yahay**

# Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee

# Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya

**Luuliyo 2017**

**Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee**

**Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya**

**TUSMADA QODOBBADA**


QAYBTA I: GUUDMAR ....... 3

1. Magaca Xeerka oo Gaaban ....... 3
2. Hadafka Xeerka ....... 3
3. Cidda lagu maamulayo ....... 3
4. Erey-bixinta ....... 3

QAYBTA II: GUDDIGA SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE DOWLADDA ....... 5

5. Doorka Guddiga ....... 5
6. Madax-bannaanida Guddiga ....... 5
7. Hawlaha Guddiga ....... 5

QAYBTA III: XUBNAHA UU KA KOOBAN YAHAY GUDDIGU ....... 6

8. Doorka Xubnaha Guddiga ....... 6
9. Soo xulidda Xubnaha Guddiga ....... 6
10. Magacaabidda Xubnaha Guddiga ....... 7
11. Cidda ka reeban qabashada xafiiska xubin ka tirsan Guddiga ....... 8
12. Xaalado gaar ah oo la xiriira shaqada xubnaha ka tirsan Guddiga ....... 8
13. Is-casilaadda Xubnaha Guddiga ....... 9
14. Hawlgabka Xubnaha Guddiga ....... 9
15. Ku-simeyaal Guddoomiyaha Guddiga ....... 9
16. Shaqaalaha Guddiga ....... 9

QAYBTA IV: HABRAACYADA GUDDIGA ....... 10

17. Shirarka ....... 10
18. Guddi-hawleedyada ....... 10

QAYBTA V: AWOODAHA GUDDIGA ....... 10

19. Wareegtooyin iyo Xeer-nidaamiyeyaal ....... 10
20. Hirgelinta Shuruucda ....... 10

QAYBTA VI: WARBIXINNADA IYO XISAABTANKA ....... 12

21. Warbixin-sanadeedda ....... 12

QAYBTA VII: QODOBBO KALE ....... 12

22. Sarreynta Xeerkan ....... 12

## QAYBTA I: GUUDMAR

**1. Magaca Xeerka oo Gaaban**

1.1 Xeerkan waxaa loogu yeeri karaa Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

**2. Hadafka Xeerka**

2.1 Hadafka Xeerkan laga leeyahay waa in lagu dhiso Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya waxaana ku jira qodobbo kahadlaya magacaabista, shuruudaha shaqaaleynta, xubnaha guddiga, awoodaha, habraacyada iyo hawlaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si waafqsan Qodobka 78aad (Mabaa'diida Guud ee Guddiyada Madaxa Bannaan) ee Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee Dowlad-Goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

**3. Cidda lagu maamulayo**

3.1 Xeerkan waxaa lagu maamulayaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah iyo Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

**4. Erey-bixinta**

4.1 Xeerkan dhexdiisa, haddii xaaladdu aaney si kale ka dhigeynin fasiraadahan soo socda ayaa la raacayaa:

a) ***"Shaqaale Rayid ah ee Dowladeed"*** waxaa loola jeedaa qof u shaqeeya Hay'ad Loo Shaqeeyo oo mushaarkiisa laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya sida ay dhigeyso faqradda 4.1e.

b) ***"Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda"*** waxaa loola jeedaa Shaqaalaha Rayidka ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladdu waxaa ay si waafaqsan qodobbada xeerkan u qabtaan dhammaan hawlaha fulinta iyo kuwa maamul iyo adeeg-bixinta ee Dowladda.

c) ***"Guddiga"*** waxaa loola jeedaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ee lagu dhisey Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

d) ***"Miisaaniyadda Mideysan"*** waxaa loola jeedaa Maaliyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaliya, laguna qeexay Qodobka 4aad ee wareegtada lagu dhisey Wasaaradda Maaliyadda Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

e) ***"Madax-Waaxeed"*** waxaa loola jeedaa waax heerkeedu gaarsiisan yahay Agaasime.

f) ***"Xeer la diidi karo"***waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiye uu Baarlamaanku u haysto muddo cayiman oo uu kaga soo horjeesan karo (diidi karo) ka hor inta *Xeer-nidaamuyuhu* dhaqangal noqon.

g) ***"Qof Shaqaale ah"*** waxaa loola jeedaa Qof Shaqaale Rayid ee Dowladeed oo ay shaqaaleysatey Hay'ad Loo Shaqeeyo.

a) ***"Hay'ad Loo Shaqeeyo"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad, wakaalad ama Guddi Madax-bannaan ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya oo shaqaaleysta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

b) ***"Shaqaalaha"*** (*Establishment*) waxaa loola jeedaa wadarta tirada, darajooyinka iyo jagooyinkaqoondo maaliyaded ku leh Miisaaniyaddadowladgoboledka Jubaland.

c) ***"Qandaraas Muddo Go'an"*** (*Fixed-term Contract*) waxaa uu macnaheedu yahay qandraas shaqaaleyn oo qof la siiyo oo muddo cayiman oo xaddidan leh.

d) ***"Dowladda"*** waxaa loola jeedaa dowlada federaalka iyo dowlad goboledyadaxubnaha ka ah.

e) ***"Dowlad-goboleedka Jubbaland*"** waxaa loola jeedaa Dowlad-goboleedka Jubbaland ee lagu dhisay si waafaqsan dastuurka ku meelgaarka ah ee soomaaliya.

f) ***"Madaxa Hay'adda Loo Shaqeynayo"*** waxaa uu macnaheedu yahay Agaasimaha Guud (Xoghayaha Joogtada ah) ee Wasaaradda ama sarkaal gacanta ku haya hawlaha fulinta ee Hay'adda Loo Shaqeynayo

g) ***"Tilmaammo/amarro"***waxaa loola jeedaa xeerar, buugaag, amarro, dhabbe-tuseyaal iyo ogeysiisyo waxaana soo saara Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah eeDowladda oo u maraya Guddoomiyaha Guddiga. Tilmaamaha (amarrada) waxaa ay caadi ahaan ay tahay in islamarkaa ama waqti cayiman lagu fuliyo..

h) ***"Madax-qaybeed"*** waxaa loola jeedaa qofka sida tooska ah uu u hoos taga Qofka ka tirsan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

i) **"Xulasho aqoon iyo karti ku dhisan"** Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda oo lagu shaqaaleeyo laguna dalacsiiyo aqoontooda iyo kartidooda waxaa uu macnaheedu yahay in:

   i. Dhammaan xubnaha bulshada ka midka ah ee xaqa u leh oo la siiyo fursad caqligal ah oo ay ku soo codsadaan in ay qabtaan hawlaha ku habboon;

   ii. Loo kuurgalo sida ay kuwa soo codsadey uga soo bixi karaan hawlaha ku habboon shaqada;

   iii. U-kuurgeliddaas sal looga dhigo aqoonta iyo kartida qofka shaqada soo codsadey.

   iv. Loo kuurgalo sida ilaa xad uu qofku ugu habboon yahay shaqada oo noqota arrinta aasaasi ahaan lagu saleynayo go'aanka la qaadanayo.

j) ***"Wasiir"*** waxaa loola jeedaa xubin ka mid ah Golaha Wasiirrada ee Dowlad goboleedka jubbaland

k) ***"Wasaarad"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad ka mid ah hay'adaha Fulinta ee lagudhisay iyada oo la raacayo dastuurka ku meelgaarka ah ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

l) ***"Qandaraas ay muddadiisu furan tahay"*** waxaa loola jeedaa qandaraas shaqaale oo qoran oo aan lahayn taariikh go'an oo uu dhammaanayo.

m) ***"Xeer-nidaamiye"***waa *xeer la diidi karo* oo bixinaya xeerar faahfaahsan oo uu diyaariyo uuna soo saaro Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si loogu hawlgeliyo waxyaabaha uu dhigayo Xeerkan. Xeer-nidaamiyeyaashan waa kuwo ay waajib tahay in loo hoggaansamo laakiin ma aha Xeer uu soo saarey Baarlamaanka.

n) ***"Mushaar"*** waxaa loola jeedaa ujuurada Qofka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda la siinayo iyada oo looga beddelanayo hawsha uu qabtay.

## QAYBTA II:GUDDIGA SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE DOWLADDA

### 5. Doorka Guddiga

5.1 Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya waxaa loo dhisay in uu kormeero habsami u shaqeynta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya iyo in uu hubiyo in Shaqaalaha Rayidka ah ay hawshoodu tahay mid hufan oo waxtar leh marka ay u shaqeynayaan bulshada, iyo in lagu fulin karo kheyraadka miisaaniyadeed ee degaannada Dowlad-goboleedka, ayna shaqadoodu sal u tahay aqoon iyo karti iyo fursad loo siman yahay.

### 6. Madax-bannaanida Guddiga

6.1 Guddigu wuu u madax-bannaan yahay hawshiisa.

### 7. Hawlaha Guddiga

7.1 Guddigu waxaa ay mas'uuliyaddiisu noqoneysaa:

a) Hubinta in si ku habboon loo hirgeliyo Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

b) Dejinta siyaasadaha, xeerarka iyo dhabbe-tuseyaasha looga baahan yahay hirgelinta Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyo hubinta ku-dhaqankooda.

c) In uu hayo diiwaanka xogta jago/shaqaale kasta oo ay leedahay hay'ad maamul kasta oo miisaaniyad loo ansaxiyey

d) In uu hayo diiwaanka xogta dhammaan shaqaalaha u shaqeeya dowladda, jagooyinka loo qaatay iyo mushaarkooda.

e) Isuduwidda shaqaaleynta, dalacsiinta, iyo beddelidda Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

f) In Guddiga iyo Wasaaradda Maaliyadda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya oo wadajira, talooyin ay Golaha Wasiirrada ka siiyaan tirada iyo heerarka darajooyinka shaqaalaha hay'adda Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyo mushaaraadka, gunnooyinka iyo xuquuqaha kale ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyaga oo ku xisaabtamaya xaaladaha dhaqaale iyo culeysyada miisaaniyadeed ee jira.

g) Wax ka qabashada arrimaha culus ee la xiriira anshaxa shaqaalaha rayidka.

h) Wax ka qabashada cabashooyinka ka yimaada Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

i) Diyaarinta warbixin sanadle ah oo ku saabsan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

## QAYBTA III k: XUBNAHA UU KA KOOBAN YAHAY GUDDIGU

### 8. Doorka Xubnaha Guddiga

8.1 Guddigu waxaa uu ka koobnaanayaaa Guddoomiye iyo Laba Guddoomiye-ku-xigeen oo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda leeyahay, lana kordhin karo haddii ay baahi timaado.

8.2 Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa uu mas'uul ka ahaanayaa maamulka guud ee Guddiga iyo Xoghayntiisa waxaana uu guddoominayaa shirarka rasmiga ah ee Guddiga.

8.3 Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa uu mas'uuliyad fulineed u kala dhiibayaa Labada Guddoomiye-ku-xigeen.

8.4 Xubnaha Guddiga Shaqaalaha waxaa ay waajibaadkooda u gudanayaan si madax-bannaan oo dhexdhexaadnimo ah oo waafaqsan shuruucda dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya. Xubnaha Guddigu waxaa ay hawshooda u gudanayaan iyaga oo la-tashanaya, kaashanayana Golaha Wasiirrada, waxaayna markasta ilaalinayaan danaha, sharafta iyo sumcadda Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya. Go'aamada Guddigu waxaa lagu salaynayaa kartida/aqoonta qofka iyada oo aan cidna lagu takoorin sababo ay ka mid yihiin dheddig/lab ahaansho, sinji, luuqad, qabiil ama siyaasad uu taageersan yahay.

### 9. Soo xulidda Xubnaha Guddiga

9.1 Xubnaha Guddiga waxaa lagu soo xulayaa geeddi socod tartan daahfuran oo ay isku soo duweyso Madaxtooyada Dowlad-goboleedka Jubbaland. Geeddi socodka soo xulidda waa in lagu soo xulaa saddex tartame oo u qalma mid kasta oo ka mid ah Jagooyinka Guddoomiyaha iyo Labada Guddoomiye ku xigeen ee Guddiga. Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ayaa saddexda

tartame ee liiskooda loo soo gudbiyey ee jago kasta mid uga soo xulaya una kala magacaabaya Guddoomiyaha Guddiga iyo Guddoomiye ku xigeennada kowaad iyo labaad.

9.2 Xubnaha Guddiga waxaa loo soo xuli doona si ka turjumeysa danaha kala duwan ee dadka Dowlad goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya. Ugu yaraan mid ka mid ah saddexda Xubnood ee Guddiga waa in ay haween ahaataa.

9.3 Guddoomiyaha iyo Labada Guddoomiye-ku-xigeen ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in ay ahaadaan muwaadiniin Soomaali ah oo leh akhlaaq wanaagsan iyo waayo-aragnimo ama aqoon xirfadeed.

**10. Magacaabidda Xubnaha Guddiga**

10.1 Xubnaha Guddiga waxaa loo magacaabayaa in ay xilka hayaan muddo Shan (5) sano oo buuxda ah, oo la cusbooneysiin karo. Waxaa mushaarkoodu noqon doonaa heerka uu ku soo taliyo Wasiirka Maaliyadda ayna oggoladaan Golaha Wasiirradu.

10.2 Magacaabistooda ka dib, Xubnaha Guddigu waxaa ay muujin doonaan doonistooda ku aaddan in ay waajibaadka jagada ka soo bixi doonaan iyaga oo la marinayo dhaartan soo socota:

*"Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilahey inan waxana iga daacad ah in aan marka aan gudanayo hawlaha la igu aaminey anniga oo ah Xubin Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda aan waajibaadkeyga u guto si madax-bannaani iyo dhexdhexaadnimo, oo waafaqsan shuruucda Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya, iyo iyada oo aan cidna lagu takooreyn sabab kasta. Waxaan la tashan doonaa oo aan kaashan doonaaa Golaha Wasiirrada waxaana aan mar walba ilaalin doona danaha, sharafta iyo sumcadda Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.''*

10.3 Ka dib marka la mariyo dhaartan kore, xubin kasta oo ka tirsan Guddiga waa in ay saxiixdaa dhaarta oo qoraal ah, taas oo nuqul kamid ah la dhigayo Xafiiska Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Jubbaland

10.4 Hadduu Madaxweynuhu helo caddeyn ah in mid ka mid ah xubnaha Guddigu uu ka soo bixi waayey shuruudaha Xeerkan, Madaxweynuhu waxa uu xubintaas ka qaadi karaa xilka xafiiska waxaana uu u magacaabi karaa cid kale oo beddesha, iyada oo loo marayo geeddi socod shaqo qoris ku saleysan aqoonta iyo kartida qofka, lagana ambaqaadayo Qodobka 9aad ee Xeerkan.

10.5 Guddoomiyaha Guddiga ayaa ka mas'uul ah maareynta hawl qabadka Guddoomiye ku xigeennada. Haddii uu Guddoomiyaha Guddigu uu dhaliilayo hawl-qabadka Guddoomiye ku xigeennada, waa in uu dhaliilahaa marka hore kala hadlo Guddoomiye ku xigeennada si waafaqsan Xeer nidaamiyeyaal uu soo saarayo Xafiiska Madaxweynaha. Haddii dhaliilaha la xiriira hawl qabadka la xallin waayo waa in arrinta loo gudbiyaa Madaxweynaha oo ka qaadi karaa tallaabo waafaqsan Faqradda 10.4 ee Xeerkan.

10.6 Haddii ay dhacdo in xil gudasho la’aan, is-casilaad ama geeri ku timaaddo xubin, Madaxweynaha waa in uu Guddiga u magacaabaa xubin cusub oo beddesha xubintaa, si waafaqsan Xeerkan.

**11. Cidda ka reeban qabashada xafiiska xubin ka tirsan Guddiga**

11.1 Qof ma noqon karo, mana sii ahaan karo, xubin ka tirsan Guddiga, haddii qofkaa uu yahay:

a) Xubin ka tirsan Baarlamaanka.

b) Xubin ka tirsan Gole Gobol.

c) Xubin ka tirsan Gole Degaan.

d) qof xafiis ka haya xisbi siyaasadeed oo diiwaangashan.

e) qof aan caqligiisu dhanneyn.

f) Qof ku xukuman xabsi toban iyo laba bilood ama ka badan ah.

**12. Xaalado gaar ah oo la xiriira shaqada xubnaha ka tirsan Guddiga**

12.1 Xubnaha Guddiga waa in aaney:

a) Ku lug yeelan siyaasad.

b) Si waafaqsan Faqradda 12.2 ugu lug yeelan maamulka ama kantaroolka shirkad.

c) Si waafaqsan Faqradda 12.3, haddiyad ku helin, oggolaan ama helin faa’iido kale oo wax u dhimi karta amaanadoooda oo aan ahayn waxa lagu siiyo shaqada ay Guddiga u hayaan.

12.2 Waxyaabaha lagu sheegey 12.1 (b) ama (c) kama hor-istaagayaan xubnaha Guddiga in ay qabtaan xafiis:

a) Urur/hay’ad xirfadeed oo ay aqoontooda u habboon tahay; ama

b) Ay Dowladda Jubbaland u magacowdo shirkad ay dano maaliyadeed ka leedahay.

i. Dano maaliyadeed oo toos ah ama aan toos ahayn aan xubinta lagu siineyn magacaabista; ama

ii. Faa’iido kasta oo maaliyadeed oo toos ah oo ay xubinta ku hesho magacaabistaa uu isagu ku daro Sanduuqa Mideysan ee Dakhliga.

12.3 Si waafaqsan sida uu dhigayo Sharciga Jubbaland, Xubin Guddiga ka tirsan waxaa ay iibsan kartaa, kireysan kartaa ama si kale u heli kartaa dhul si la mid ah iyo si waafaqsan shuruudaha ku xiran muwaadin kasta oo kale.

## 13. Is-casilaadda Xubnaha Guddiga

13.1 Xubin ka tirsan Guddiga waxaa ay isku casili kartaa iyada oo bixisa ogeysiis bil ah oo ay arrinta ay damacsan tahay ugu sheegeyso Madaxweynaha Dowlad goboleedka Jubbaland.

## 14. Hawlgabka Xubnaha Guddiga

14.1 Si waafaqsan Faqradda 14.2, qofka ay da'diisu gaarto 60 sano waa in aan loo magacaabin ama dib loogu magacaabin Xubin Guddiga ka mid ah.

14.2 Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Jubbaland, ayaa isagoo la tashanaya Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda, waxaa uu, sababo gaar ah oo jira daraadood oo xaalad gaar ah waafaqsan, qof ay da'diisu ka badan tahay 60 sano jir u magacaabi kara ama  dib ugu magacaabi kara xubin Guddiga ka tirsan, laakiin marna Xubin Guddiga ka tirsan ma sii ahaan karo marka uu qofkaasi gaaro ama gaarto da'ada 65 sano jir.(hadii ay timaado baahi in laga maarmi waayo in xubin kamid ah guddiga oo gaaray/gaartay da'da hawlgabka,Madaxweynaha wuxuu awood u leeyahay in uu u kordhiyo muddada xilka.)

## 15. Ku-simeyaal Guddoomiyaha Guddiga

15.1 Madaxweynaha oo tixgalinayaa soo jeedinta Guddoomiyaha Shaqalaha Rayidka wuxuu ku sime u magacaabi karaa mid kamid ah ku xigeenada Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka.

a) Marka ay jagadu ku bannaanaato is casilaad, hawlgab, shaqo-ka-joojin ama geeri ku timaadda xubin/Xubno Guddiga;

b) Marka mid ka mid ah xubnaha Guddiga uu waajibaadkiisa shaqo u gudan waayo xanuun ama dhaawac ba'an daraaddii,

c) Marka mid ka mid ah Xubnaha Guddiga uu ku maqnaanayo fasax ka badan 3 bilood.

15.2 Qofka ku sime Guddoomiye u qabta xilka Guddomiyaha sida ay tilmaamayso faqradda 15.1 a) iyo b) waxaa uu jagadaas haynkaraa ugu badnaan lix (6) bilood marka laga reebo in uu Madaxweynahu u magacaabo xilka guddomiyenimo si rasmi ah

15.3 Qofka ku sime Guddoomiye u qabta xilka Guddoomiyaha sida ay tilmaamayso faqradda 15.1 a) iyo b), waxaa uu qaadanayaa mushaar u qalma darajada iyo xilka uu hayo.

15.4 Guddoomiyaha Guddiga waxaa uu mid ka mid ah Guddoomiye ku xigeennadiisa u magacaabi karaa inuu ku sime unoqdo, ama   qof u qalma hadii ay maqanyihiin guddomiye ku xigeenadisa.

**16. Shaqaalaha Guddiga**

16.1 Guddiga waxaa taageeri doona Xoghayn. Shaqaalaha Xoghaynta waxaa ay noqon doonaan Shaqaale Rayid ah ee Dowladeed waxaana lagu shaqaaleyn doonaa si waafaqsan shuruudaha uu u dejiyey Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

16.2 Tirada iyo heerka jagooyinka Xoghaynta waxaa go'aaminaya Guddoonka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda isaga oo Wasaaradda Maaliyadda kala tashanaya sida miisaaniyad loogu heli karo.

16.3 Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ayaa laga bixin doona mushaaraadka Guddiga iyo Xoghayntiisa. Miisaaniyadda Guddiga waxaa lagu go'aaminayaa geeddi socodka miisaaniyad sanadeedda

## QAYBTA IV: Habraacyada Guddiga

**17. Shirarka**

17.1 Guddigu waxaa uu shirar yeelanayaa ugu yaraan bishiiba mar si uu uga fekero unafalanqeeyo siyaasadda iyo xeerarka, dibu eegisna ugu sameyo codsiyada iyo dacwadaha anshax marinta iyo dhaqangalinta Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda. Ugu yaraan saddex meelood labo (**2/3**)oo Guddiga ka mid ah waa in ay goob joog ahaadaan si uu shir u qabsoomo.

**18. Guddi-hawleedyada**

18.1 Guddigu waxaa uu dhisi karaa guddiyo hawleed iyo guddiyo wada tashi oo ka talo bixiya siyaasadaha lagu maareynayo shaqaalaha rayidka ah ee Dowladda Jubbaland.

## QAYBTA V: Awoodaha Guddiga

**19. Wareegtooyin iyo Xeer nidaamiyeyaal**

19.1 Guddigu waxaa uu dejin karaa soona saari karaa **Xeer-nidaamiyeyaal** iyo **Tilmaamo/amarro** lagama maarmaan u ah hirgelinta qodobbada Xeerkan iyo Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

**20. Hirgelinta Shuruucda**

20.1 Si loo hubiyo in si ku habboon loo hirgeliyo Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda, xeer nidaamiyeyaashiisa, tilmaan bixintiisa iyo amarradiisa, Guddigu waxaa uu shaqaalaha Xoghaynta u oggolaan karaa in ay:

a. Booqdaan meel kasta oo ay ka shaqeeyaan shaqaale rayid ah ee dowladeeduna kormeeraan xaaladaha shaqada,

b. Baaraan diiwaannada qoran ee la xiriira shaqo qorista iyo shaqaaleynta shaqaalaha rayidka ah ee Dowladda.

c. Wareystaan shaqaalaha rayidka ah ee Dowladda.

20.2 Guddiga waa in uu muddo ogeysiin loogu talo galey oo caqli gal ah siiyaa shaqaalaha taas oo ugu sheegayo in uu damacsan yahay in uu soo booqdo goob shaqo, uu baaro xogta qoran ama uu qaado wareysiyo.

## QAYBTA VI: Warbixinnada  Iyo Isla-Xisaabtanka

### 21. Warbixin sanadeedda

21.1 Guddiga Shaqaalaha Rayidka waa inuu soo saaraa warbixin sanadeed dhamadka sanad kasta taasoo ku  saabsan:

a. Hawlihii uu Guddigu qabtay muddadii sanadka ahayd

b. Tirada Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowlad Goboleedka, darajooyinkooda, tirada lab iyo dhedigah iyo xog ku saabsan shaqoqorista, hawlgabka, is-casilaadda, beddelaadda, codsiyada, anshax-marinta iyo rusqeynta.

c. Guddigu waxaa uu soo saari karaa warbixino kale oo uu muhiim u arko

## QAYBTA VII: Qodobbo Kale

### 22. Sarreynta Xeerkan

22.1 Marka laga hadlaayo shaqaalaha rayidka e Dowlad Goboledka Jubaland, haddii uu jiro sharci macne Kan ka soo horjeeda dhigaya, qodobbada Xeerkan ayaa ka sarreeya. Xeer kasta oo ka soo horjeeda Xeerkanna wax baa laga beddeley si loo waafajiyo qodobbada Xeerkan.

Wixii aan xeerkan lagu xusin, waxaa loola noqonayaa Xeerkii Shaqalaha Rayidka Soomaaliya ee 1960.

22.2 .Dhaqan  Galka Xeerkan

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka ay meel mariyaan labada gole ee Dowlad Goboleedka Jubbaland, kadibna uu saxiixo Madaxweynaha Dowlad Goboledka Jubbaland.

DOWLAD GOBOLEEDKA
JUBBLAND EE SOOMAALIYA.
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha.

JUBBALAND STATE OF SOMALIA
State Assembly
Office of the speaker.

دولة إقليم جوبالاند
الصومالية

Ref/JSA/793/2018

23/04/2018

Ujeedo: Go,aan Ansixin Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dowlad Goboleedka Jubbaland.

Markuu arkay: Qodobka 31 ee dastuurka dowladda Goboleedka Jubbaland ee somalia.

Markuu ogaaday : Baahida weyn ee loo qabo in lahelo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee reer Jubbaland

Markuu arkay: Codsigii Madaxweynaha ee uu ku codsanaaye in la ansixiyo Hindise Sharciyeedkaan

Markuu ku Qancay: Wax ku darista iyo wax ka badalka ay ku sameeyeen Golaha Shacabka.

**Wuxuu**

Cod aqlabiyad ah (50 cod )oo gacan taag ah ku ansixiyay Ansixinta Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dowlada Jubbaland halka (0) aay diideen waxaana ka aamusay (1) Mudane.

ALLAHA MAHAD LEH.

Mudane: Abdi Mohamed Abdirahman
Guddomiyaha Golaha Shacabka Jubbaland

GUDDOOMIYAHA GOLAHA SHACABKA EE DOWLAD GOBOLEEDKA JUBALAND
THE SPEAKER OF THE JUBALAND STATE PARLIAMENT

Email hon.sh.abdi@hotmail.com, Kilasma@hotmail.com Tel: +252618908065, Kismayo - Jubbaland - Somalia

DOWLAD GOBOLEEDKA JUBALAND
EE SOOMAALIYA

دولة إقليم جوبالاند الصومالية
مكتب الرئيس

XAFIISKA MADAXWEYNAHA

JUBALAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Tix-raac: XM/DGJS/199/2020

Taariikh: February 17, 2020

**UJEEDDO: XEERKA GUDDIGA SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE DOWLAD GOBOLEEDKA JUBALAND**

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 47aad farqadiisa 4aad faraciisa (III iyo IV) ee Dastuurka Dowlad Goboleedka Jubaland; |
| Markuu Arkay: | Go'aanka Golaha Shacabka Dowlad Gobeleedka Jubaland; |
| Markuu Arkay | Go'aankii Golaha Fulinta. |

Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Jubaland wuxuu xeeriyey **Xeerka Guddiga shaqaalaha Rayidka ah** ee Dowlad Goboleedka Jubaland.

.......................................

Mudane Axmed Maxamed Islaam
Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Jubaland ee Soomaaliya

Aqalka Madaxtooyada, Kismaayo, Jubaland, Soomaaliya
Email: presidency@jubalandstate.so